



Amarka caafimaadka dadweynaha ee burinaya shuruudaha maaski ku xirashada goobaha caafimaadka

Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) waxaa uu qaatay sharciga joogtada ah ee ku xirashada maaskiga goobaha caafimaadka Janaayo 31, 2022. OAR 333-019-1011. Sida ku cad sharciga ah in Agaasimaha Caafimaadka Dadweynaha ee Gobolka ama Sarkaalka Caafimaadka Dadweynaha ee Gobolka uu soo saari karo amar burinaya shuruudaha xirashada maaski caafimaad ahaan loogu tala galay haddii shuruudahaas aysan dib dambe lagama maarmaan ugu ahayn in la xakameeyo COVID-19.

Wixii loo gaaro 3da Abriil, 2023, sharuudaha maaski ku xirashada goobaha caafimaadka ee OAR 333-019-1011 dib dambe uma ahaanayaan dhaqan gal. Shuruudaha maaski xirashada caafimaad ahaaneed maahan kuwo lagama maarmaan ah wixii intaan ka dambeeya sababtoo ah saamaynta COVID-19 ayaa hoos ugu dhacday Oregon siyaabo dhowr ah daraadood. OHA ayaa eegay sharuudo gaar ah oo haddii loo hoggaansamo uu tilmaamay in halista isu gudbinta fayraska ay hooseynayso ilaa ay saamaxayso inaan wax intaa ka badan loo baahan doonin ku xirashada maaskiyada gudaha goobaha caafimaadka. Sharuudaha waxaa ka mid ah ayadoo aanay ku koobneyn:

Baar qabitaanka COVID-19 ee ka hooseeya 10% muddo labo asbuuc ah oo isku xiga, ayadoo taasi ay ku salaysan tahay macluumaad laga helay warbixinada shaybaarka ee elektarooniga ah ee Oregon, iyo

Baar qabitaanka hargabka ee ka hooseeya 5% muddo labo asbuuc ah oo isku xiga, ayadoo taasi ay ku salaysan tahay macluumaad laga helay ka qeybqaateyaasha Nidaamka Habdhiska Neefmareenka Qaran ee Oregon iyo Lasocoshada Fayrasyada Kufaafa Aduunka, iyo

Baar qabitaanka Fayraska Habdhiska Neefsashada ee keena calaamado khafiif ah oo u eg kuwa qaboowga (RSV) ee ka hooseeya 10% (baaritaanka antigen) iyo ka hoose 3% (baaritaanka iniinaha molecular) muddo labo asbuuc ah oo isku xiga, ayadoo taasi ku salaysan tahay macluumaad laga helay ka qeybqaateyaasha NREVSS.

Maamulka Oregon wuxuu u hoggaansamay sharuudahaas dhammaantood.

Maamulka OHA wuxuu kula talinayaa dadka halista sare ugu jira cudur halis ah iyo isbitaal dhigid, gaar ahaan kuwa kunool xaafado isu gudbin fayras ku badan tahay, inay sii wadaan xirashada maaskiyada markii ay joogaan goobaha caafimaadka. Maamulka OHA wuxuu sidoo kula talinayaa sii wadida ku xirashada maaskiyada goobaha caafimaadka dadka:

Aan la tallaalin,

Dadka uu difaaca jirkoodu hooseeyo,

Dadka leh xaalado caafimaad,

Dadka jira 65 ama ka weyn, ama

La nool kuwa kale oo halis sare ugu jira cudur daran.


OHA waxa ay sii wadi doontaa in ay ka shaqeyso sidii ay u kordhin lahayd helida tallaalada, maaskaraha tayada leh, baadhista iyo daawaynta ee bulshooyinka sida gaarka u saameeyay COVID-19.

Ma jiro wax amarkan ka mid ah oo ka mamnuucaya hay'ad dawladeed, ganacsi, ama goob shaqo inay uga baahdaan in shakhsiyaadku xidhaan maaskaro. Shakhsiyaadka raba inay sii wataan xirashada maaskaro si ay uga hortagaan COVID-19 waa u xor inay sidaas sameeyaan.

Taariikhda oo ah maalinta 3aad ee Abriil 2023.



Rachael Banks
Agaasimaha Caafimaadka Fayo-Dhawrka
Maamulka Caafimaadka Oregon
Qaybta Caafimaadka Fayo-Dhawrka



Dean Sidelinger
Sargaalka Caafimaad iyo Dhakhtarka Cudurada Faafa
Maamulka Caafimaadka Oregon
Qaybta Caafimaadka Fayo-Dhawrka

Helida dukumintiga: Waxaad ku heli kartaa dhukumintigaan luuqado kale, daabacaad qoraal waaweyn ku qoran, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kalaxiriir Kahortagga Cudurrada Degdegga ah iyo Kuwa Faafa 971-673-1111 ama iimeylka OHD.ACDP@dhsosha.state.or.us. Maamulka OHA wuxuu aqbalaa dhammaan wicitaanada gudbinta ah ama waxaad wici kartaa 711.